# Xuquuqdaada
# Macluumaadkaaga
# Mas'uuliyaddayada

Sarkaalka Ilaalinta xogta ee HHSA
M/S W-294
P.O. Sanduuqa Boostada 85524
San Diego, CA 92186
619-237-8571
www.cosdcompliance.org

Ogeysiiskani wuxuu sharxayaa sida macluumaadkaaga caafimaad loo isticmaali karo loona shaacin karo, iyo sida aad u heli karto macluumaadkan.

**Fadlan si taxaddar leh u eeg.**

## Xuquuqdaada

Marka ay timaaddo macluumaadkaaga caafimaad, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah. Qaybtani waxay sharxaysaa xuquuqdaada iyo qaar ka mid ah mas'uuliyadaha naga saaran caawintaada:

| | |
|---|---|
| **Hel nuqul elektaroonig ah ama warqad ah oo diiwaankaaga caafimaad ah** | • Waxaad codsan kartaa inaad aragto ama hesho nuqul elektaroonig ah ama warqad ah oo diiwaankaaga caafimaad ah iyo macluumaad kale oo caafimaad oo aan kaa hayno. Naga codso sida tan loo sameeyo.<br>• Waxaan ku siin doonnaa nuqul ka mid ah macluumaadkaaga caafimaad, badanaa 30 maalmood gudahood laga bilaabo codsigaaga. Waxaa laga yaabaa inaan kaa qaadno lacag yar oo macquul ah ku saleysan kharashka nagu baxay.<br>• Waxaad awoodi u yeelan kartaa inaad ka gasho diiwaankaaga caafimaadka "Marinka bukaanka." |
| **Naga codso inaan saxno diiwaankaaga caafimaad** | • Waxaad naga codsan kartaa inaan saxno macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan oo aad u aragto inuu khaldan yahay ama dhammaystirnayn. Naga codso sida tan loo sameeyo.<br>• Waxaan ku dhihi karnaa "maya" codsigaaga, laakiin haddii aan dhahno maya, waxaan qoraal ahaan kuugu sheegi doonnaa sababta 60 maalmood gudahood. |
| **Codso isgaarsiin sir ah** | • Waxaad naga codsan kartaa inaan kula soo xiriirno hab gaar ah (tusaale, taleefanka guriga ama xafiiska) ama inaan boostada ku dirno cinwaan kale.<br>• Waxaan "haa" ka dhihi doonnaa dhammaan codsiyada macquulka ah. |
| **Naga codso inaan xaddidno waxa aan isticmaalno ama wadaagno** | • Waxaad Naga codsan kartaa inaanan isticmaalin ama wadaagin macluumaad caafimaad oo gaar ah si loogu adeegsado daaweynta, lacag-bixin, ama hawlgalladeena.<br>• Qasab naguma aha inaan oggolaanno codsigaaga, waxaana dhihi karnaa "maya" haddii ay taasi saameyn karto daryeelkaaga.<br>• Haddii aad si buuxda uga bixiso adeeg ama shay daryeel caafimaad adigoo jeebkaaga ka bixinaya, waxaad naga codsan kartaa inaanan la wadaagin macluumaadkaas shirkaddaada caymiska caafimaadka ujeeddooyinka lacag-bixinta ama hawlahayaga.<br>• Waxaan dhihi doonnaa "haa" haddii uusan sharci nagu qasbin inaan wadaagno macluumaadkaas. |

| | |
|---|---|
| **Hel liis dadka aan la wadaagnay macluumaadka** | • Waxaad na waeydiin kartaa liis (xisaab) waqtiyadii aan la wadaagnay macluumaadkaaga caafimaad lix sano ee ka horreeya taariikhda aad codsato, cidda aan la wadaagnay, iyo sababta.<br>• Waxaan ku dari doonnaa dhammaan shaacinta marka laga reebo kuwa la xiriira daaweynta, lacag-bixin, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, iyo shaacinno kale oo gaar ah (sida kuwa aad naga codsatay inaan sameyno). Waxaan ku siin doonnaa hal xisaab sanadkii bilaash, balse waxaan qaadi doonnaa khidmad macquul ah oo ku saleysan kharashka haddii aad codsato mid kale 12 bilood gudahood. |
| **Hel nuqul ka mid ah ogeysiiskan ilaalinta xogta** | • Waxaad mar kasta codsan kartaa nuqul warqad ah oo ogeysiiskan ah, xitaa haddii aad oggolaatay inaad ku hesho si elektaroonig ah. Waxaan si degdeg ah kuugu siin doonnaa nuqul warqad ah. |
| **Dooro qof kuu matala** | • Haddii aad qof siisay awood sharciyeed caafimaad ama haddii qof yahay mas'uulkaaga sharciga ah, qofkaas wuxuu adeegsan karaa xuquuqdaada wuxuuna go'aan ka gaari karaa macluumaadkaaga caafimaad.<br>• Waxaan hubin doonnaa in qofkaas leeyahay awooddan oo uu kuu matali karo ka hor inta aan tallaabo qaadin. |
| **Gudbi cabasho haddii aad dareento in xuquuqdaada lagu xadgudbay** | • Waxaad caban kartaa haddii aad dareento inaan ku xadgudubnay xuquuqdaada adigoo nala soo xiriiraya adigoo isticmaalaya macluumaadka ku yaal bogga 1.<br>• Waxaad cabasho u gudbin kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka adigoo: wacaya 1-877-696-6775, diraya warqad cinwaankeedu yahay: 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, ama booqanaya www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/<br>• Ma aargoosan doonnohaddii aad gudbiso cabasho. |

## Macluumaadkaaga

Sideen caadi ahaan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaad? Caadi ahaan waxaan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaad si:

| | | |
|---|---|---|
| **Aan kuu daaweyno** | Waxaan isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaad waxaanan la wadaagi karnaa xirfadlayaal kale oo ku daaweynaya. | **Tusaale**: Dhakhtar kaa daaweynaya cudur ayaa dhakhtar kale ka weydiinaya xaaladdaada guud ee caafimaadkada.<br>**Tusaale**: Haddii aadan noo sheegin inaanan samayn, waxaan gelin karnaa macluumaadkaaga Is-weydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka (HIE) halkaas oo xirfadlayaal kale oo caafimaad ay ka heli karaan macluumaadka si ay u isku dubbaridaan daryeelkaaga. |

<table>
<tr><td>Maamul hawlaha hay'addayada</td><td>Waxaan isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan u bixino adeegyo, u hagaajino daryeelkaaga, oo aan kula soo xiriirno marka loo baahdo.</td><td>Tusaale: Waxaan u isticmaalnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan u maamulno sida ay shaqaalaheenna kuugu daryeelayaan.</td></tr>
<tr><td>Inaan biil ka soo saarno adeegyada laguu qabtay</td><td>Waxaan isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aan u biil dirno una helno lacag-bixin ka timaadda qorshayaasha caymiska caafimaadka ama hay'ado kale.</td><td>Tusaale: Waxaan siinnaa macluumaadkaaga qorshahaaga caymiska caafimaadka si ay u bixiyaan kharashka adeegyadaada.</td></tr>
<tr><td colspan="3">Sidee kale ayaan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad? Waxaa naloo oggol yahay ama nalaga doonayaa inaan u wadaagno macluumaadkaaga siyaabo kale – badanaa siyaabo u adeega dan guud, sida caafimaadka dadweynaha iyo cilmi-baarista. Waa inaan buuxinnaa shuruudo badan ka hor inta aanan u wadaagin macluumaadkaaga ujeeddooyinkan. Macluumaad dheeraad ah ka eeg: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html</td></tr>
<tr><td>Caawinta arrimaha caafimaadka dadweynaha iyo badbaadada</td><td colspan="2">Waxaan wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad xaalado gaar ah sida:<ul><li>Ka hortagga cudurrada</li><li>Ka caawinta dib-u-celinta alaabada</li><li>Ka warbixinta dhibaatooyinka ay daawooyinku keenaan</li><li>Ka warbixinta xadgudub, dayacaad, ama rabshad qoys</li></ul></td></tr>
<tr><td>Samee cilmi-baaris</td><td colspan="2">Waxaan isticmaali karnaa ama wadaagi karnaa macluumaadkaaga cilmi-baarista caafimaadka.</td></tr>
<tr><td>U hoggaansamidda sharciga</td><td colspan="2">Waxaan wadaagi doonnaa macluumaadkaaga haddii sharciyada gobolka ama federaalku sidaas naga doonayaan, oo ay ku jirto la wadaagidda Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii ay rabto inay hubiso inaan u hoggaansanayno sharciga asturnaanta federaalka.</td></tr>
<tr><td>La shaqee baaraha dhimashada ama agaasimaha aaska</td><td colspan="2">Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka baare dhimasho, dhakhtar baaritaan caafimaad, ama agaasime aaska marka qof dhinto.</td></tr>
<tr><td>Ka jawaabidda magdhowga shaqaalaha, fulinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dawladda</td><td colspan="2">Waxaan isticmaali karnaa ama wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad:<ul><li>Wixi ku saabsan magdhowga shaqaalaha.</li><li>Wixi ku saabsan ujeedoyinka fulinta sharciga ama lala wadaago sarkaal fulinta sharci.</li><li>La wadaagidda hay'adaha kormeerka caafimaadka hawlo uu sharcigu oggol yahay.</li><li>Hawlaha dawladeed ee gaarka ah sida milatariga, amniga qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha.</li><li>Waxaan wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad anagoo ka jawaabayna amar maxkamadeed ama amar maamul, ama ka jawaabaya amar maxkamadeed oo qoraal ah.</li></ul></td></tr>
<tr><td colspan="3">Macluumaad caafimaad oo gaar ah, waxaad noogu sheegi kartaa doorashadaada ku saabsan waxa aan wadaagno. Haddii aad leedahay doorbid cad oo ku saabsan sida aan u wadaagno macluumaadkaaga xaaladaha hoos ku xusan, nala hadal. Noo sheeg waxa aad rabto inaan sameyno, waxaanan dadaalkeenna ugu badan ku sameyn doonnaa inaan raacno tilmaamahaaga.</td></tr>
</table>

| | |
|---|---|
| **Xaaladahan, waxaad leedahay labadaba xaq iyo doorasho inaad noo sheegto inaan:** | • La wadaagno macluumaad qoyskaaga, asxaabtaada, ama dadka kale ee ku lug leh daryeelkaaga<br>• La wadaagno macluumaad xaalad gargaar musiibo.<br>• Kula soo xiriirno ujeeddooyin lacag-ururin.<br>• La wadaagno macluumaad gaar ah oo ku saabsan daaweyntaada daroogo iyo khamri. Macluumaadkan wuxuu u baahan karaa oggolaansho qoraal ah ka hor inta aanan la wadaagin cid kale.<br>Haddii aadan awoodin inaad noo sheegto doorashadaada, tusaale ahaan haddii aad miyir beeshay, waxaan wadaagi karnaa macluumaadkaaga haddii aan aaminsanahay inay ku jirto dantaada ugu fiican. |
| **Xaaladahan, marna ma wadaagno macluumaadkaaga ilaa aad naga siiso oggolaansho qoraal ah** | • Ujeeddooyin suuq-geyn.<br>• Iibinta macluumaadkaaga. Marnaba ma iibin doonno macluumaadkaaga.<br>• Inta badan wadaagidda qoraallada cilmi-nafsiga. Ma hayno qoraallo cilmi-nafsiyeed.<br>• Inta badan wadaagidda qoraallada la-talin ee xanuunka isticmaalka maandooriyaha (SUD). Ma hayno qoraallo la-talin oo SUD ah. |

## Mas'uuliyaddayada

Sharcigu wuxuu nagu waajibinayaa inaan ilaalinno xogtada khaaska ah iyo amniga macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyo.

- Waxaan si degdeg ah kuugu soo sheegi doonnaa haddii jebin dhacdo oo laga yaabo inay waxyeelleysay xogtada khaaska ah ama amniga macluumaadkaaga.
- Waa inaan raacnaa waajibaadka iyo habraacyada xogta khaaska ee lagu sharaxay ogeysiiskan oo aan ku siinnaa nuqul ka mid ah.
- Ma isticmaali doonno ama ma wadaagi doonno macluumaadkaaga si ka duwan sida halkan lagu sharaxay ilaa aad qoraal ahaan noo oggolaato. Haddii aad noo sheegto inaan sidaas sameyn karno, waad beddeli kartaa go'aankaaga wakhti kasta. Nagu soo wargeli qoraal ahaan haddii aad beddesho go'aankaaga.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Ogeysiiskan, la xiriir Sarkaalka xogta khaaska ee HHSA adigoo isticmaalaya macluumaadka xiriirka ee ku yaal Bogga 1 ee Ogeysiiskan ama ka eeg: [www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html](www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html)

**Isbeddellada Shuruudaha Ogeysiiskan**: Waxaan beddeli karnaa shuruudaha ogeysiiskan, isbeddelladuna waxay khuseyn doonaan dhammaan macluumaadka aan kaa hayno. Ogeysiiska cusub wuxuu diyaar noqon doonaa marka la codsado, xafiiskayaga, iyo boggeena internetka.

- Taariikhda uu dhaqan-galay Ogeysiiskani waa Febraayo 16, 2026.